



trisam

Trisam – tidig rehabilitering i samverkan Wadashaqeyn iyo xog isweydaarsi

Trisam waxa weeye wadashaqeyn ka dhaxeysa Region Gävleborg (primärvården iyo psykiatrin), Försäkringskassan, Arbetsförmedlingen iyo degmada. Wadashaqeynta kooxda Trisam ayaa degmooyinka gobolka Gävleborg oo dhan laga helayaa. Waxa Kooxda Trisam ka tirsan shaqaale daryeelka caafimaadka iyo kaaliye ka socda Arbetsförmedlingen, Försäkringskassan iyo degmada. Waxa Region Gävleborg kaga jira iskuduwaha baxnaaninta iyo haddii loo baahdo, shaqaalaha daryeelka ee ay khuseyso. Waxaanu ka shaqeynaa si aanu taageero ka sii wanaagsan oo la isku soo ururiyey oo baxnaanintaada kuugu siino.

Si loogu awoodo in macluumaadka la dhiibo ayaa, ogolaansho loogu baahan yahay –

Kiisaska aad arin kaaga socota *Försäkringskassan* ayaa kaaliyaha *Försäkringskassan* kula soo xiriiri doona si uu oggolaansho ugu helo. *Taasi waa si ay Försäkringskassan macluumaadkaaga ula wadaagi karto dhinacyada kale ee oggolaanshaha ku jira.*

Si aanu ugu awoodno inaan si wanaagsan kuugu caawino ayaanu ugu baahanahay macluumaad wada socda oo adiga iyo xaaladaada ku saabsan. Sidaa darteed ayaa loogu baahan yahay oggolaansho qoraal ah oo adiga kaa socda si aanu macluumaadka lagama maarmaanka ah ee dhexdayada ugu wadaagno. Macluumaadka noocaas ah ayaa haddii kale uu xeerka siriyantu ilaalinayaa.

Macluumaadka lagama maarmaanka ahi tusaale ahaan waa.

- xaalada caafimaadka
- xaaladaha shaqada
- waxqabadyadii hore ee baxnaaninta
- xaaladaha bulsho iyo dhaqaale ahaaneed
- baaritaanadii hore
- faalooyinka khabiirada, tusaale ahaan faalooyinka caafimaadka.

Bogga xigga ayaad foomka oggolaanshaha ka helaysaa. Waxa uu oggolaanshuhu shaqaynayaa laga bilaabo maalinta aad saxeexdo foomka iyo ilaa inta ay isku dubbaridka baxnaanintaadu socoto. Waxay taasi shaqeynaysaa ugu badnaan hal sano laga bilaabo wakhtiga aad oggolaanshaha saxeexday.

Waxaad markaad doonto la soo laaban kartaa oggolaanshahaaga. Waxaad taas ku sameynaysaa adigoo la xidhiidhaaya kaaliyahaaga jooga hay'adda ay khusayso ama cidaad ku qaabilsan xaruntaada caafimaadka/qeybta dhakhtarka.



trisam

Oggolaanshaha wadashaqeyn iyo xog isweydaarsi Trisam dhexdeeda

Magaca	Lambarka shakhsiga
Cinwaanka boostada	Koodhka boostada iyo goobta
Lambarka telefoonka ee maalintii	Mobaylka

Oggolaanshaha

Waxaan oggolaansho siinayaa shaqaalaha jooga rugta caafimaadka ama qeybta dhakhtarka ee ay khuseyso ee aan xidhiidhka daryeelka ku leeyahay, kaaliyaha jooga waxqabadyada degmadeyda iyo sidoo kale Försäkringskassan iska kaashadaan baahiyahayga.

Kaaliyaha Försäkringskassan ayaa kula soo xidhiidhi doona si uu oggolaansho uga helo si ay Försäkringskassan macluumaadkaaga ula wadaagi karto dhinacyada kale ee oggolaanshaha ku jira.

Waxaan oggolaanayaa inay wakiilada waxqabadyadani ay macluumaadka igu saabsan aniga ee lagama maarmaanka ah isdhaafsadaan, inay dhokumentiyada iyo diiwaanada caafimaadka helaan iyadoo aanu xeerka sirhantu qabaneynin si ay iyadoo Trisam la soo maraayo ugu awoodaan inay si wax ku ool ah baxnaaninteyda ugu kaalmeeyaan.

Waxaan xitaa oggolaanayaa in waxqabadyadan ama dadkan soo socdaa ay ka qeybqaataan si ay iigu siiyaan taageero ka sii wanaagsan oo la isku soo ururiyey oo baxnaanintayda. Hoosku sheeg, tusaale ahaan Loo shaqeyaha iyo magaciisa. Oggolaanshaha la siinaayo waxqabadyadan ama dadka soo socota ee kaliya khuseya Trisam ayaa la soo dhammeeyey.

--	--

Waxaan ogahay inaan markaan doono oggolaanshaheyga la soo laaban karro. Waxa uu taasi micnaheedu yahay in haddii aan oggolaanshahayga la soo noqdo aanay macluumaadka dheeraadka ah oo aniga igu saabsan dhinacyada oggolaansha lagu sheegay isdhaafsan doonin. Macluumaadka haddaba la soo ururiyay ayaase la maareyn doonaa, laakiin aan la kaabi doonin lana cusbooneysiin doonin.

Saxeexa

Taariikhda



trisam Magaca oo cad

Aqoonsiga la qariyey/xogta shakhsiga ee la qariyey

Dadka leh aqoonsi la qariyey ama xogta shakhsiga ee la qariyey ayaanay dabooli doono shaqada wadashaqaynta Trisam dhexdeeda. Waa inaanad sidaas daraadeed foomka ogolaanshaha saxeehin haddii aad aqoonsi la qariyey ama xogta shaqsiga oo la qariyey leedahay.

Su'aalaha?

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama haddii aad wax ka fikireyso ayaa lagugu soo dhaweynayaa inaad kaaliyahaaga jooga hay'adda ay khuseyso la soo xiriirto ama la xiriir qofka ku qaabilsan rugta caafimaadka ama qeybta cisbitaalka.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sida aanu u maarayno macluumaadkaaga shakhsiga ee Trisam ku jira iyo isku dubbaridka baxnaanintaada, fiiri macluumaadka ku jira bogga internetka ee cid kasta oo aanu wadashaqeyno.

[Macuumaadkaaga aanu kaa heyno ee ku jira diiwaankayaga -Arbetsförmedlingen \(arbetsformedlingen.se\)](http://www.arbetsformedlingen.se)

<https://www.regiongavleborg.se/dataskydd>

